



# Sumowga Botulism

## Waa maxay sumowga botulism?

- Sumowga botulism waa cudur dhif ah oo muruqyada ku rida qallal ama dhaqaaq-joojin waxana keena sun (walax sun ah) uu sameeyo *Clostridium botulinum* (*C. botulinum*), oo ah bakteeriya si dabiici ah looga helo ciidda. Waxaa jira saddex nooc oo waaweyn oo ah sumowga botulism: *sumowga cunto keento*, *sumowga ilmaha yar*, iyo *sumowga nabarka*. Sunta Botulism waxa loo isticmaali karaa hub biyoolooji ah sababta oo ah hawo ahaan ayaa loo neefsan karaa ama waa la liqi karaa.

## Sidee ayuu u fidaa suwomga botulism?

### Waa maxay astaamaha lagu yaqaano?

- Waxa uu sumowga botulism kugu dhici karaa marka aad cuntid cunto ku wasakheysan bakteeriyyada cudurka keenta ama marka nabar uu wasakheeyo bakteeriyyada cudurka keenta. Qofku cudurka **uma** gudbiyo qof kale. Qadarka soo-gaadhistaa suntu ayay ku xidhan tahay dhakhsaha ay astaamuhu u soo baxaan ama lagu arko — taasoo ah dhawr saacadood ilaa dhawr maalmood.
- Si kasta ha ahaato sida suntu ku soo gashay jidhka, naatiijooyinka waa isku mid. Marka cudurku sii socdo, astaamaha la isku arko waxa ka mid ah arag ah laba-laba ama arag isku darsan, galaka indhaha oo hoos u dhacsan, hadal isku darsan, liqista oo dhib ah, af qallalan, iyo tabar-dari muruq (kaasoo ka bilaabma garbaha oo hoos ugu sii dega jidhka). Ugu dambeyn, waxa laga yaabaa in muruqyada neefsashadu istaagaan taasoo keenta dhimasho haddii aan gargaar neefsasho laga helin mishiin ama qalab.

- **Sumowga botulism ee cunto keento** waxa uu dhacaa marka qofku cuno cunto ku wasakheysan bakteeriyyada sameysa sunta. Tani waxay badanaa ka timaadaa farsamooyin qasaceyn cunto oo aan fiicnayn oo guriga lagu qabtay. Astaamaha ugu horeeya ee la arko waxa ka mid noqon kara lallabo/yalaalugo iyo matag. Sumowga botulism ee cuntadu keento waxa uu ku dhici karaa dhammaan kooxaha dadka ee ah da' kasta. Meesha ay ka timid cuntada wasakheysan waa in sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogal ah loo garto si dadka kale looga ilaaliyo inay jirradaan.
- **Sumowga botulism ee ilmaha yar** waxa uu ku dhacaa tiro yar oo ah ilmo yaryar sannad kasta oo xiidmahooda ku leh bakteeriyyada *C. botulinum*.

- **Botulism-ka nabarka** waxa uu dhacaa marka nabar uu wasakheeyo bakteeriyyada *C. botulinum*, tusaale ahaan, haddii iyada oo dibadda la joogo uu nabar wasakhoobo marka ay taabato ciid wasakheysan. Bakteeriyyadu waxa kaliya ee ay cudur ku ridi kartaa maqaarka dhaawacan.

## Talaabooyinka ka-hortagga

- Haddii aad leedahay astaamo, fadlan sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogal ah la tasho ama u tag bixiye daryeel caafimaad. Haddii aad rumeysan tahay in si kasah laguu soo gaadhsiiyay botulism, waa inaad isla markiiba la xidhiidhid saraakiisha fulinta sharciga.
- Ma jiro tallaal lagaga hortago botulism. Wuxuu aad yareyn kartaa halista soo gaadhista marka aad raacdil hab ka shaqeeyn iyo karin cunto oo ammaan ah iyo adiga oo nabarada ama meelaha jeexan ka dhiga nadiif isla markaana si haboon u saara faashad.

## Daweynta botulism

- Daweyn dhakhsso ah waa lagama-maarmaan. Xarumaha Xakameynta iyo Ka-hortagga Cuduradu (Centers for Disease Control and Prevention) waxay hayaan kayd ah lidka sunta ee lagu dawweyo botulism. Dawadan waxa kaliya ee waaxaha caafimaadka ka heli kara bixiyeyal daryeel caafimaad marka la tuhmo ama la xaqijiyo botulism. Dawadu waxay yareysaa darnaanta ama dhibka astaamaha haddii goor hore qofka la siiyo. Badi bukaanku ugu dambeyn way ka ladnaadaan.



Public Health Division  
800 NE Oregon St.  
Suite 465 B  
Portland, OR 97232

Bogga Internetka:  
[healthoregon.org/preparedness](http://healthoregon.org/preparedness)

971-673-1315

HSPR Pub 12-3-12  
Somali